JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند

| | | |
|---|---|---|
| *Sannadka 10aad* | *Cadad Gaar ah* | *03/07/2021* |

# XEERKA MAAL-GASHIGA SOMALILAND
# XEER LR.99/2021

Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web. www.garyaqaankaguud.com

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2021*

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-687/062021 Taar: 12/06/2021

## Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Xeerka Maal-gashiga**
**Xeer Lr. 99/2021**

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobada 75aad ee Datuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada Go'aan Lr.GW/KF-45/887/2021, ee ku taariikheysan 23/05/2021, ee ay ku ansixiyeen Xeerka Maal-gashiga, Xeer Lr. 99/2021;

Waxaan soo-saaray;

Dhaqan-galka Xeerka Maal-gashiga Jamhuuriyadda Somaliland, Xeer Lr. 99/2021.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

The Republic of Somaliland
House of Representatives
Head Quarter Hargeisa.

Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha wakiilada
Xarunta Hargeisa

Ref: GW/KF-45/887/2021 Date: 20/05/2021

Ku: Madaxweynaha JSL = Madaxtooyada=

Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Maalgashiga XEER LR: 99/2021

GOLAHA WAKIILLADU

**Markuu Arkay**: **Qodobka 11aad, 75aad, 76aad iyo 77aad** ee Dastuurka Qaranka JSL.

**Markuu Arkay**: Baahida loo qabo Xeerka Maalgashiga oo qayb ka noqonaya koboca dhaqaalaha iyo horumarka Dalka JSL,

**Markuu Aqoonsaday**:- In hirgelinta Xeerka Maalgashigu aas-aas u noqonayo Maalgashiga iyo hab-raacyada loo marayo si waafaqsan xeerkan.

**Markay U Caddaatay** In Horumarinta Maalgashigu ay u baahan tahay in la helo xeer loo raaco noocyada kala duwan ee Maalgashiga Maxalliga ah iyo dhammaan hawlaha la xidhiidha.

**Markuu Arkay**: Soo jeedinta Xukuumadda ee Qabyo-qoraalka Xeerka Maalgashiga oo ay Golaha u soo gudbisay, iska markaana dhagaystay Warbixinta Gudidda u qaabilsan Golaha Arrimaha Dhaqaalaha, ka dibna, Mudanayasha Goluhu ay ka doodeen.

**Markuu Arkay** Qodobka **78 (1aad)** ee Dastuurka JSL oo tilmaamay dabciga Xeeraarka Maaliyadeeda isla markaan u dhigan, ***Mashruuc-sharci kasta aan ahayn kuwa maaliyadda oo Golaha Wakiiladu aqlabiyad ku oggolaado waa in loo gudbiyo Golaha Guurtida.***

**Markuu Arkay** Qaraarka Maxkamadda Sare JSL ee Sumaddiisu tahay MS/DD/01/2019 ee 10/12/2019 ujeeddadiisuna ahayda Qaraar Fasiraad Qodobbo Dastuuri ah.

**Markuu u Codeeyay**: Ansixinta Xeerka **Maalgashiga Xeer LR.99/2021 Kal-fadhiga 45aad ee Fadhigiisi 22aad** taariikhduna ahayd **11/04/2021** oo ay goob joog ahaayeen **(42)** Mudane oo ka mida mudanayaasha Golaha Wakiilada .

# WUXUU

Cod aqlabiyad ah **40 cod** oo gacan taag ah ku Ansixiyay **Xeerka Maalgashiga Xeer (LR.99/2021**) halka cidina aanay diidin, **Hal (1**) mudane-na ka aamusay **Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caadada ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada

Baashe Maxamed Faarax
Guddoomiyaha GolahaWakiilada

## GOLAHA WAKIILLADU

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobada $11^{aad}$, $75^{aad}$ $76^{aad}$, $77^{aad}$ ee Dastuurka Qaranka JSL. |
| Markuu Arkay: | Baahida wayn ee loo qabo Xeerka Maalgashiga oo qayb ka noqonaya koboca dhaqaalaha iyo horumarka Dalka JSL. |
| Markuu Aqoonsaday: | In hirgelinta Xeerka Maalgashigu aas-aas u noqonayo Maalgashiga iyo hab-raacyada loo marayo si waafaqsan xeerkan. |
| Markay u caddaatey | In Horumarinta Maalgashigu ay u baahan tahay in la helo xeer loo raaco noocyada kala duwan ee Maalgashiga Maxaliga ah iyo dhammaan hawlaha la xidhiidha. |
| Markuu Arkay: | Soo jeedinta Xukuumada ee Qabyo-qoraalka Xeerka Maalgashiga oo ay Golaha u soo gudbisay, iska markaana dhagaystay Warbixinta Guddida u qaabilsan Golaha Arrimaha Dhaqaalaha, ka dibna, Mudanayaasha Goluhu ay doodeen. |

**WUXUU ANSIXIYAY**
**Xeerka Maalgashiga Somaliland**
**Xeer Lr. 99/2021**

| QAYBTA 1AAD<br>QODOBBO GUUD: | PART ONE<br>GENERAL PROVISIONS |
|---|---|
| **Qodobka 1aad:**<br>**Magaca Xeerka** | **Article 1:**<br>**Short Title** |
| Xeerkan waxa loogu yeedhayaa "Xeerka Maalgashiga Jamhuuriyadda Somaliland ee Xeer Lr.99/2021. | This Law shall be sited as the "Investment Act of the Republic of Somaliland. No: 99/2021. |
| **Qodobka 2aad:**<br>**Erey-bixin** | **Artice 2:**<br>**Interpretations** |
| Ereyadan soo socda ee Xeerka ku jira, haddii si ka duwan aanu qodobku u qeexin, waxa ay la micno noqonayaan sidan: | The following terms in this Law, unless otherwise specified in the context, shall mean: |
| 1) **Xeer:** waxa loola jeedaa Xeerka Maalgashiga Somaliland ee Xeer Lr. 99/2021. | 1) **Law:** refers to Somaliland Investment Act No: 99/2021. |
| 2) **Maalgashi:** waxa loola jeedaa in hanti, mid la taabankaro iyo mid aan la taabankarinba, loo adeegsado ujeeddo macaash-samayn ah isla markaana uu maalgashade ku maalgashado dhulka Jamhuuriyadda Somaliland si waafaqsan Xeerkan | 2) **Investment:** refers to the use of every kind of asset, tangible or intangible, for profit-making purpose, established by an investor in the territory of the Republic of Somaliland in accordance with this Somaliland Investment Law. |
| | 3) **Investor:** refers to any |

| | |
|---|---|
| Maalgashiga ee Somaliland. | |
| 3) **Maalgashade:** waxa loola jeedaa qof dabiici ah iyo hay'ad leh shakhsiyad qaanuuni ah oo codsigooda maalgashi ee Somaliland la aqbalay, ha ahaado maalgashe waddani ah ama mid shisheeye ah. | natural or juridical person whose application for investment in Somaliland has been accepted, whether a domestic or foreign investor. |
| 4) **Maalgashi Shisheeye:** waxa loola jeedaa maalgashi kasta oo uu sameeyo maalgashade shisheeye oo hantidiisa ku maalgashaday Jamhuuriyadda Somaliland si waafaqsan Xeerkan. | 4) **Foreign Investment**: refers to any investment made by a foreign person with the funds invested in the Republic of Somaliland in accordance with this Law. |
| 5) **Maalgashi Waddani ah:** waxa loola jeedaa maalgashi kasta oo uu sameeyay muwaadin reer Somaliland ah oo hantidiisa ku maalgashaday Jamhuuriyadda Somaliland si waafaqsan Xeerkan. | 5) **Domestic Investment:** refers to any investment made by a Somaliland citizen whose property has been invested in the Republic of Somaliland in accordance with this Law. |
| 6) **Maalgashade Shisheeye:** waxa loola jeedaa – | 6) Foreign Investor: means—<br>a) a natural person, who is not a citizen of the Republic of |

a) Qof dabiici ah, oo aan ahayn muwaadin reer Somaliland ah; ama
b) Shirkad lagu aasaasay xeer dal kale oo aan ahayn Jamhuuriyadda Somaliland; ama
c) Shirkad lagu aasaasay xeerarka Jamhuuriyadda Somaliland balse saamiyadeeda inta badan uu leeyahay qof aan ahayn reer Somaliland.

7) **Maalgashi Toos ah:** waxa loola jeedaa maalgashi, ha ahaado mid kali lagu yahay ama lagu wada jiro'e, cusub, hadda taagan ama socday, kaasoo u suurogaliya maalgashade ama koox maalgashadeyaal ah in ay sameeyaan, helaan ama ay dan joogto ah ku yeeshaan ganacsi.

8) **Raasamaal"** waxa loola jeedaa lacagta dalka ama lacag ajaanib ah, qalab, dhisme, raasamaal shaqo, Xuquuqda hantida,

Somaliland; or
b) a company incorporated under the laws of any country other than that of the Republic of Somaliland; or
c) a company incorporated under the laws of the Republic of Somaliland in which the majority of the shares are held by a person who is not a citizen of Somaliland.

7) **Direct Investment**: means an investment, whether single or combined, new, current or successive, which enables an investor or group of investors to establish, acquire or have a lasting interest in a business.

8) **"Capital"** means local or foreign currency, equipment, building, working capital, property right, intellectual property right, or other tangible or intangible business assets;

9) **Investment incentive;** is a

Xuquuqda Hal-abuurka ama hanta kasta oo la taaban karo ama aan la taaban karin oo ganacsi.

9. **Dhiirigelin maalgashi; Dhiirigelin maalgashi;** waxa loola jeeedaa siyaasad dhiirigalin oo ay dawladdu hirgalisay oo loogu talagalay in lagu dhiiri geliyo maalgashadayaasha suuqyada dalka ama in la dhiirrigeliyo ballaarinta ganacsiyada jira.

9) .

10) **Codsade:** waxa loola jeedaa cidda doonaysa in ay Dalka maalgashato.

11) **Maalgelin Shuraako ah:** waxa loola jeedaa maalgashiga ay si wada jir ah u wada sameeyaan muwaadin reer Somaliland ah iyo qof ajnabi ahi.

12) **Wasaarad:** waxa loola jeedaa Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga ee Somaliland.

13) **Wasiir:** waxa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga

government-implemented **incentive** policy implemented by the government aimed to encourage **investors** int o its domestic market or to promote expansion of existing businesses.

10) **Applicant:** refers to the prospective investor who intends to invest in the Country.

11) **Joint Venture Investment**: refers to any investment jointly made by Somaliland citizen and foreign investor.

12) **Ministry:** refers to the Somaliland Ministry of Investment Promotion.

13) **Minister:** refers to the Minister for Investment Promotion of Somaliland.

14) **Country:** refers to the Republic of Somaliland.

15) **Government:** refers to the Government of Somaliland.

16) **One stop shop**: refers to a location or office that serves investors and provides all services they need.

17) **Environmental Impact**

| | |
|---|---|
| Somaliland.<br>14) **Dal:** Waxa loola jeedaa dalka Jamhuuriyadda Somaliland.<br>15) Xukuumad: Waxa loola jeedaa Xukuumadda Somaliland.<br>16) **Goob-Adeegeed**: waxa loola jeedaa goob ama xafiis ay maalgashadayaashu macluumaadka iyo adeegyada ay u baahanyihiin ka helayaan.<br>17) **Warbixinta Qiimeynta Saamaynta Deegaanka**: waxa loola jeedaa warbixinta muujinaysa saamayn kasta oo mashruuc maalgashi uu u gaysan karo deegaanka.<br>18) **Shahaadada Maalgashiga:** waxa loola jeedaa Shahaadada ay bixiso Wasaaraddu ee lagu aqoonsanayo maalgashade si Xeerkan waafaqsan.<br>19) **Hanti Muuqata:** waxa loola jeedaa hantida maalgashi ee la galiyo mashruuca la maalgelinayo, oo ay ku jiraan lacagta iyo | **Assessment Report:** refers to a report that indicates any impact caused to the environment by an investment project.<br>18) **Investment Certificate**: means a license issued by the Ministry officially recognizing the investor in accordance with this law.<br>19) **Tangible Assets:** refers to investment assets investing in the investment project, including cash and non-cash assets. |

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

hantida kale ee aan lacag ahayni.

**Qodobka 3aad:**

**Ujeeddooyinka Xeerka**

1. Ujeeddooyinka xeerka waxa ka mid ah:
   - **a.** In la maamulo, kor loo qaado la fududeeyo lana dhiirigaliyo maalgashiga Jamhuuriyada Somaliland,
   - **b.** In uu ka qayb qaato koboca dhaqaale ee dalka;
   - **c.** In uu abuuro habraac lagu cidhibtiro faqriga, laguna yareeyo shaqo la'aanta Dalka ka jirta; iyo
   - **d.** In uu bixiyo habab lagu xalliyo khilaafaadka ku lugta leh arrimaha maalgashiga.

**Article 3:**
**Objectives of the Law**

1. The objectives of the act are
   - a. To manage, promote, facilitate and encourage the investiment of Republic of Somlailnd
   - b. To contribute to the economic growth of the Country;
   - c. To eliminate poverty and reduce unemployment in the Country; an
   - d. To provide for dispute settlement mechanisms involving the investment matters.

| | |
|---|---|
| **Qodobka 4aad: Xadka Adeegisga Xeerka** | **Article 4: Scope of Application** |
| 1) Qodobada Xeerkan waxa lagu dabbaqayaa: -<br>a) Maalgashiyada tooska ah ee ay sameeyaan shaqsiyaad caadi ah ama shirkado leh jiritaan qaanuuni ah oo waddani ah ama shisheeye ah oo maalgashanaya kana ganacsanaya Jamhuuriyadda Somaliland.<br>b) Maamulidda, horumarinta iyo fududaynta maalgashiyadan soo socda: -<br>i. Maalgashiga uu dhammaantii leeyahay maalgashade shisheeye ahi;<br>ii. Maalgashiga ay wada sameeyaan maalgashade waddani ah iyo mid shisheeye ahi; iyo<br>iii. Maalgashiga uu sameeyo | 1) The provisions of this Law shall be applicable to: -<br>a) Direct investments made by a domestic or a foreign natural persons or legal entities, investing and doing business in the Republic of Somaliland.<br>b) The administration, promotion and facilitation of the following investments: -<br>i. wholly foreign owned investment;<br>ii. joint investment made by domestic and foreign investors; and<br>iii. Investment made by a domestic investor in the Republic of Somaliland. |

maalgashe muwaadin reer Somaliland ahi.

## QAYBTA 2AAD MAAMULIDDA MAALGASHIGA

### Qodobka5aad: Xilka iyo Waajibaadka Wasaaradda

1) Xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga waxa ka maid ah;

a) Maamulidda iyo isku xidhka arrimaha maalgashiga ee Jmahuuriyadda Somaliland.

b) Abuuridda xidhiidh wada shaqayneed oo dhexmara maalgashadayaasha iyo hay'adaha Xukuumadda ee kale iyo wasaaradaha ay khusayso ee masuulka ka ah khayraadka la maalgashanayo.

c) Dhiirigelinta maalgashiga shisheeyaha, Soo jiidashada maalgashiga qurbajooga iyo kor u

## PART TWO ADMINISTRATION OF INVESTMENT

### Article 5: Duties and Responsibilties of the Ministry

1) The Ministry of Investment Promotion shall have the following duties and responsibilities: -

a) To regulate and coordinate investment matters in the Republic of Somaliland,

b) To co-ordinate and establishes working relationship among investors and other government agencies and line-ministries which are responsible for the resources invested in.

c) Encourage foreign investment, attract diaspora investment and promote domestic investment

d) collect and disseminate information about

| | |
|---|---|
| qaadida maalgashiga gudaha<br>d) ururinta iyo faafinta macluumaadka ku saabsan fursadaha maalgashi iyo illaha dhaqaalaha maalgashiga, dhiirigelinta ay heli karaan maalgashadayaashu iyo jawiga maalgashiga ee dalka;<br>**e)** Abaabulka wax-qabadyo sida bandhigyo, aqoon-isweydaarsiyo iyo seminaaro dalka gudihiisa iyo dibediisaba**;**<br>f) Qabashada codsiyada shahaadooyinka maalgashiga, cusbooneysiintooda iyo burinta shahaadooyinka maalgashiga iyo diiwaangelinta hantida maalgashiga ee ay dalka la keeneen maalgashadayaasha shisheeye;<br>g) kormeeridda hirgelinta mashaariicda maalgashiga ee ay bixisay shahaadooyinkooda, iyo hubinta in | investment opportunities and sources of investment capital, incentives available to investors and the investment climate;<br>e) organizing such activities as exhibitions, workshops and seminars locally or abroad<br>f) receive and process applications for investment certificates issue, renew and cancel investment certificates within its jurisdiction and register investment capital brought into the country by foreign investors;<br>g) Monitor the implementation of investment projects for which it has issued certificates, ensure that the terms of the investment certificates are complied with and incentives granted to investors are used for the intended purposes.<br>h) Establishment of a "One-Stop-Shop" for investors that provides all investment |

| | |
|---|---|
| shuruudihii shahaadada maalgashiga loo hogaansamay iyo sidoo kale dhiirrigelinta la siiyo maalgashadayaasha loo isticmaalo ujeeddooyinka loogu talagalay; | facilitation services they need; |
| h) Samaynta goob-adeegeed laga wada helayo adeegyada hawsha u fududaynaya maalgashadayaasha ee ay u baahanyihiin; | i) Preparing the policies and plans required for an investment in order to create an environment attraction for investors to invest in the country; |
| i) Diyaarinta siyaasadaha iyo qorsheyaasha uu maalgashigu u baahanyahay si maalgashadayaasha loogu abuuro deegaan soo jiidasho oo ay Dalka ku maalgashadaan; | j) Review and amendment proposals and recommendations of investment related laws. |
| j) Dib u eegista iyo wax ka bedelka qorsheyaasha iyo talobixinaha la xidhiidha xeerarka maalgashiga. | k) Conducting researches and preparing up to date information about investment opportunities in the Country; |
| k) Samaynta cilmibaadhis iyo diyaarinta xog sax ah oo la xidhiidha fursadaha maalgashi ee Dalka; | l) Registration of investors and protection of the their rights in collaboration with other concerned Government ministries and agencies; |
| l) Diiwaangelinta | m) Implementation of the investment policies and strategies in the Country;<br>n) Develop, review and disseminate the investment guidelines;<br>o) Supervise and monitor of investment projects to ensure compliance |

| | |
|---|---|
| maalgashadayaasha iyo ilaalinta xuquuqdooda iyadoo la kaashanaysa wasaaradaha iyo wakaaladaha kale ee Xukuumadda ee ay khusayso; | with the provisions of this Law in collaboration with the line-ministries. |
| m) Fulinta siyaasadaha iyo istiraatiijiyadaha maalgashi ee Dalka | p) Strengthening the relationships between investors, public institutions and the public; |
| n) Horumarinta, dib u eegista iyo soo bandhigista hagayaasha maalgelinta; | q) Resolution of investment related disputes; and |
| o) Kormeeridda iyo dabogalka mashaariicda maalgelineed si loo hubiyo in ay u hogaansanyihiin qodobada Xeerkan iyadoo la kaashanaysa wasaaradaha ay khusayso; | r) Intering into piletaral and multilateral investment agreemenets with other countires. |
| p) Xoojinta xidhiidhada u dhexeeya maalgashadayaasha, hay'adaha dawladda iyo dadwaynaha; | s) Carry out any other duties imposed by this act, its regulations and the National Investment Policy or by any other law of the Country. |
| q) Xallinta khilaafaadka la xidhiidha maalgashiga; iyo | |
| r) galidda heshiisyo maalgashi ee wadan | |

ama wadamo kale.

s) Fulinta wixii waajibaad ah ee kale ee ay jideeyaan Xeerkan, xeer-nidaamiyeyaasha ka farcama, siyaasadda Qaran ee Maalgashiga ama xeerarka kale ee Dalka.

t)

**Qodobka 6aad;**
**Qaybaha Mudnaanta Maalgashiga**

Waxa mudnaanta, xagga ogolaanshaha iyo fududaynta maalgashiga, la siinkaraa maalgashiga ku aaddan meelaha: -

1) Leh ka faa'iidaysi midho-dhal oo ku aaddan khayraadka dabiiciga ah iyo dadka Somaliland;
2) Soo kordhinaya teknoolojiyad ku habboon xaaladaha Dalka;
3) Keenikara dakhli ama kaydad sarrifka qalaad ah iyada oo loo marayo wax dhoofin, soo dejin khayraad ku salaysan ama hawlo adeegyo ah; iyo
4) Ka qayb qaadanaya gobol ahaan horumar dhaqan-dhaqaale oo

**Article 6:**
**Investment Priority Sectors**

Priority, in terms of approval and investment facilitation, may be given to investments in those areas where it: -

1) Puts to productive use of Somaliland's human and natural resources;
2) Introduces innovative technology suited to the country's conditions;
3) Generates new earnings or savings of foreign exchange, through exports, resource-based import substitution or service activities; and
4) Contributes to regionally balanced socio- economic development. This refers especially to investment in, or closely related to: -
   a) Agriculture.

| | |
|---|---|
| dheelli-tiran. Gaar ahaan waxa arrintan loola jeedaa maalgashiga lagu sameeyo ama la xidhiidha:<br>a) Beeraha. | |
| b) Xoolaha nool | b) Livestock. |
| c) Kalluumaysiga | c) Fishing. |
| d) Macdanta. | d) Mineral resources. |
| e) Hawlaha warshadaha iyadoo loo adeegsanayo xaddi dedaal ah oo la bixinayo oo ku aaddan wadaagyadan hore. | e) Industrial activities using significant amount of inputs produced, by afore-mentioned sectors. |
| f) Dalxiiska, iyadoo ay shardi tahay in maalgashigu uu ku habboonyahay xaaladaha bulsho, dhaqaale iyo kaabeyaal. | f) Tourism provided that the investment harmonizes with the prevailing social, economic and infrastructural conditions. |
| g) Wixii kale ee maalgashi ah, ee hawlo adeeg ama waxsoo saar ah, ee ku habboon in ay taageeraan ama furfuraan, heer muhiim ah, horumarinta wadaagyada kor ku xusan. | g) Any other investment, in production and service activities, suited to support and stimulate, in a significant degree, the development of the aforementioned sectors. |

| Qodobka 7aad<br>Codsiga Maalgashiga Muwaadinka | Article 7:<br>Investment Application by a Domestic Investor |
|---|---|
| 1) Codsiga shahaadada maalgashiga ee uu codsanayo muwaadinka raba in uu maalgashi sameeyaa, waxa loo gudbinayaa Wasaaradda maalgashiga iyada oo lagu soo gudbinayo foomka loogu talogalay, laguna soo lifaaqayo iyo nuqulada hoos ku xusan:<br>a) Haddii maalgashiga uu samaynayo shakhsi, nuqul kaadhka aqoonsiga qofka maalgashiga samaynaya iyo laba sawir oo nooca baasaaboorka ah oo dhawaan la galay;<br>b) Hadiii maalgashiga ay samaynayso shirkadi, nuqul ka mid ah heshiiska saamiilayda iyo Xeerka aasaaska shirkadda iyo nuqulada kaadhadhka | 1) An application for investment Certificate by a domestic investor shall be submitted to the investment Ministry in the prescribed form together with the following documents in one copy:<br>a) where the investment is to be made by an individual person, a photocopy of his identity card and his recent two passport size photographs;<br>b) where the investment is to be made by a company or business organization, a certified copy of its memorandum and articles of associations, and copies of every shareholder’s identity cards |

aqoonsiga ee saamiileyaasha.

**Qodobka 8aad:**

**Codsiga Maalgashiga ee Qofka** Ajaanibka ah

1) Codsiga shahaadada maalgashiga ee doonaya in uu maaligalin sameeyo waxa loo gudbinayaa Wasaaradda Maalgashiga iyada oo lagu soo gudbinayo foomka loogu talagalay laguna soo lifaaqayo nuquladan hoos ku xusan:-
   a) Haddii uu maalgashiga samaynayo shakhsi, nuqulka baasaaboorkiisa oo sax magaciisuna ku cad yahay, laba sawir oo nooca baasaaboorka ah oo uu dhawaan galay;
   b) Haddii maalgashiga ay samaynayso shirkad, magaca ay ku diwaangashan tahay iyo waddanka ay ka diwaangashan tahay shirkaddu, shahaadadeeda

**Article 8:**

**Investment Application by a Foreign Investor**

1) Application for investment Certificate by a foreign investor shall be submitted to the investment Ministry in the prescribed together with the following documents in one copy:

a) where the investment is to be made by an individual person, a photocopy of the relevant pages of a valid passport showing his identity and his recent two passport size photographs;

b) Where the investment is to be made by a company or a business organization, the registered name and country of incorporation of the company, its certificate of incorporation and certified copy of its memorandum and articles of association.

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

| | |
|---|---|
| diwaangalinta iyo nuqul heshiiska saamiileyda iyo xeerka aasaaska shirkadda ah. | |
| **Qodobka 9aad:**<br>**Shuruudda Codsiga Maalgashiga** | **Article 9:**<br>**Conditions of Investment Application** |
| 1) Codsiga maalgalintu waa in uu noqdo mid ku qoran Af-Soomaali ama Af-Ingiriisi hadii loo baahdo,_waana in uu saxeexo codsaduhu | 1) The investment application shall be written in Somali or in English **if it's necessary** and shall be duly signed by the applicant, where the applicant is a natural person, or by a legal proxy, where the applicant is an entity or a natural person in his or her absence. |
| 2) Codsigu waa in uu ka koobnaado faahfaahintan soo socoto:- | 2) The application shall have the following details:- |
| a) Mashruuca maalgashigu waa in uu yahay mid cayiman waana in uu waafaqo wadaagyada mudnaanta leh ee ku xusan Qodobka 6aad ee Xeerkan. | a) The investment project shall be specific and shall conform to the priority sectors stated under Article 6 of this Act. |
| b) Warbixinta xisaab bangi oo muujinaya raasamaalka maalgashiga. | b) Bank statement with regard to the capital of |
| c) Nuqul sawir ah oo ah heshiiska asalka ah iyo nuqul sawir ah oo ah turjumaadda heshiiska | |

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

oo Af-Soomaali ah, haddii maalgelintu ay tahay mid la wadaagayo.

d) Ujeedada mashruuca, lacagta lagu maalgalinayo, wakhtiga iyo faahfaahinta shaqaalaha mashruuca waa in lagu xuso.

e) Haddii mashruuca maalgashigu uu saamaynayo deegaanka; warbixinta qiimaynta saamaynta deegaanka waa in ay codsiga ku lifaaqan tahay.

**Qodobka 10aad:**

**Soo-saarista Shahaadada Maalgashiga**

1) Wasaaraddu marka ay hesho codsiyada ku xusan Qodobada 7aad iyo 8aad ee Xeerkan, waxay ku darsaysaa 30 maalmood gudhadood si waafaqsan xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaasha ka dheegma, waxayna:

the investment.

c) A copy of the original agreement and acopy of its official translatio into Somali language, where the investment is on a joint venture.

d) The purpose of the project, the funding, the timing and credentials of the project human resources shall be stated.

e) In the event the investment project may affect the environment; an environmental impact assessment report shall be attached to the application.

**Article 10:**

**Issuance of Investment Certificate**

1) within 30 days from receipt of an application made in accordance with Aricles 7 and 8 of this Act, the Ministry shall, after examining the

| | |
|---|---|
| a) Soo saaraysaa shahaadada maalgashiga haddii ay ku qanacdo codsiga;<br><br>b) Ku wargalinaysaa maalgashadaha go'aankeeda diidmada iyo sababta ay u diiday oo qoraal ah haddii aanay ku qancin codsiga.<br><br>2) Haddii la rabo in codsiga wax laga soo bedelo, waa in codsadaha si dhakhso ah arrintaa loogu wargeliyo 30 maalmood gudahood<br><br>3) Haddii Wasaaradu ogolaato codsiga maalgashiga ee maalgashadaha; shahaado muujinaysa waxa maalgashigiisa loo ogolaaday ayay Wasaaradu u soo saaraysaa,<br><br>4) Shahaadaha maalgalintu waxa ay shaqaynaysaa muddo Laba iyo toban (12) bilood ah oo ka bilaabmaya maalinta la | intended investment activity in light of this Act, and regulations and directives issued hereunder:<br>a) issue investment Certificate, where the application is found acceptable; or<br>b) notify the investor of its decision and the reason thereof in writing, where the application is found unacceptable<br>2) In the event a modification of an application is required, the applicant shall immediately be notified to that effect within 30 days<br>3) In the event the Ministery has approved the investment application of the investor; a "Certificate of Investment in an approved enterprise" shall be issued by the Ministery,<br>4) The "Certificate of Investment in an approved enterprise" shall be valid for a period |

bixiyay, muddadaa dhexdeeda, codsaduhu waa in uu fuliyo dhammaan wixii kale ee waajibaad ah ee looga baahanyahay si xeerkan iyo xeerarka dalka waafaqsan.

**Qodobka 11aad:**

**Cusboonaysiinta Shahaadada Maalgashiga**

1) Shahaadada maalgashiga dib ayaa loo eegayaa sanad kasta

2) Codsiga cusboonaysiinta shahaadada maalgashigau waxa la soo gudbinayaa laguna cusboonaysiinayaa bil gudaheed kadib dhammaadka muddada halka sano ah ee ay shahaadadu ansaxa tahay.

3) Wasaaraddu shahaadada maalgashiga dib u eegis bay ku samaynaysaa, haddii ay ku qanacdo in ay jiraan sababo keenaya dib u dhaca bilawga ama dhammaystirka fulinta mashruuca

of twelve (12) months as of date of issue, during which, the applicant shall fulfill all other legal obligations and requirements in accordance with this act and other laws of the Country.

**Article 11:**
**Renewal of Investment Certificate**

1) An investment Certificate shall be renewed every year.
2) An application for renewal of an investment Certificate shall be submitted and renewed within one month after the end of a period of one year for which the permit remains valid.
3) The Ministry of Investment shall renew the investment Certificate, where satisfied, as to the existence of sufficient cause for the delay in the commencement or completion of his project implementation.
4) Any investor, who has not commenced implementing his project within two years since

| | |
|---|---|
| maalgashi. | the issuance of the investment Certificate, shall have his permit cancelled without any precondition. |
| 4) maalgashade kasta oo aan ku bilaabin mashruuciisa maalgalineed laba sano gudahood oo ka bilaabanta markii la siiyay shahaadada maalgashiga, waxa la burinayaa shahaadadiisa maalgashiga | |
| **Qodobka 12aad:** | **Article 12:** |
| **Wareejinta Shahaadada Maalgashiga** | **Transfer of the Investment Certificate** |
| 1) Shahaadada maalgashiga laguma wareejin karo qof kale ama shirkad kale haddii aanay Wasaaraddu ogolaan marka hore. | 1) An investment certificate may not be transferred to another person or company without prior written approval of the Ministry. |
| 2) Wareejinta shahaadada maalgashiga waxa ku xidhan shuruudaha lagu sheegay shahaadada waxana shardi ah in aanay shuruudahaas jabin. | 2) The transfer of an investment certificate is subject to any restrictions prescribed in the investment certificate provided it does not breach those conditions. |
| **Qodobka 13aad:** **Wax ka bedelka Shahaadada Maalgashiga** | **Article 13:** **Amendment of the Certificate** |
| 1) haddii uu codsado maalgashaduhu, Wasaaraddu wax bay | 1) **If the invester requests,** |

| | |
|---|---|
| ka bedeli kartaa shahaadada maalgashiga iyada oo raacaysa shuruudaha wax ka bedelka ee lagu sheegi doono xeer-nidaamieyaasha xeerkan ka dheegma. | the Ministry may amend an investment certificate subject to any restrictions prescribed in the regulations under this Act. |
| 2) Haddii waxa laga bedelo nuxurkeeda waxa loo gudbinayaa Wasaaradda si ay u ansixiso. | 2) Where any change is made in its content, it shall be submitted to the Ministry for approval. |
| **Qodobka 14aad: Hakinta iyo kala noqoshada Shahaadada Maalgashiga.** | **Article 14: Suspension and Revocation of Investment Certificate** |
| 1) Haddii maalgashaduhu jabiyo qodobada xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaasha ka dheegma, Wasaaraddu waxay ka hakin kartaa shahaadada maalgashiga ilaa inta uu maalgashaduhu ka saxayo qaladaadkiisa. | 1) Where an investor violates the provisions of this Act or regulations issued to implement this Act, the Ministry may suspend the investment Certificate until the investor takes due corrective measures. |
| 2) Wasaaraddu waxay ku hakin kartaa shahaadada maalgashiga asbaabahan soo socda: | 2) The Ministry may suspend an investment Certificate on the following grounds; |
| a) Haddii maalgashigu uu halis ku yahay nabadgelyada qaranka, caafimaadka, xuquuqda aadamaha, | a) If the investment poses threat to national security, health, human rights, environment or cultural concerns. |
| | b) If the information given |

| | |
|---|---|
| deegaanka ama dhaqanka. | in the investment application was false or incorrect. |
| b) Haddii macluumaadka lagu qoray codsiga maalgashigu uu ahaa been ama mid aan sax ahayn. | |
| c) Haddii hawlahaa maalgashigu ay ku xadgudbeen heshiiskii maalgashiga. | c) If the investment engagements have violated the investment agreement. |
| d) Haddii ogolaanshaha maalgashiga ee la siiyay uu uga faa'iidaystay dano kale oo aan loo ogolaan. | d) If the approval investment granted has been taken advantage of other interests not permitted. |
| e) Haddii dhiirigalintii la siiyay si khaldan loo isticmaalay ama si sharci darro ah qof kale lagu wareejiyay; | e) If the incentives granted are misused or illegally transferred to another person. |
| f) Haddii maalgashaduhu sabab la'aan ku guuldaraysto in uu cusboonaysiiyo shahaadada si waafaqsan Qodobka 11aad ee Xeerkan; | f) If the investor has failed, without good cause, to renew the Certificate in accordance with Article 11 of this Act. |
| g) Haddii maalgashaduhu uu ku xad-gudbay qodobada Xeerkan, xeer-nidaamiye ka dheegmay ama xeerarka kale ee dhaqangalka ah ee Dalka. | g) If the investor has violated any provision of this Law, subsequent regulation or other applicable laws of the Country. |
| | h) If the investor transferred the investment permission to a third party without legal authorization. |
| | i) If the investor has failed to start the investment project within agreed time and without reasonable causes. |

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

| | |
|---|---|
| h) Haddii maalgashaduhu Shahaadadii maalgashi ee la siiyay uu u wareejiay cid saddexaad isagoon ogolaansho sharci ah haysanin. | j) If the conditions of the investment certificate were breached. |
| i) Haddii maalgashaduhu ku guul darraysto in uu bilaabo mashruucii maalgelinta muddadii lagu heshiiyay isagoon haysan sababo la garawsan karo. | |
| j) Haddii shuruudihii shahaadada maalgashiga lagu bixiyay la jabiyay. | |
| 3) Haddii Wasaaraddu go'aamiso in la hakiyo shahaadada maalgashiga, waxay maalgashadaha shahaadada laga hakinayo la siinayaa ugu yaraan soddon maalmood oo ogaysiis qoraal ah oo lagu sheegayo sababaha looga hakinayo waxana fursad loo siinayaa in uu isdifaaco oo sheego sababaha aanay ahayn in shahaadada looga hakiyo. | 3) where the Ministry decides to suspend an investment certificate, the Ministry shall give the holder of the investment certificate at least thirty days written notice of the grounds for the proposed suspension and shall give the holder an opportunity to make representations as to why the investment certificate should not be suspended. |
| 4) Haddii maalgashaduhu aanu ku xallin | 4) Where the investor has not settled the causes for suspension during suspended time provided under sub-article 3 of this article, then the Ministry shall revoke the investment certificate. |

sababaha looga hakinayo, muddada hakinta ee ku xusan farqada 3aad ee qodobkan, Wasaaradda waxa ku waajiba inay buriso shahaadadii maalgashiga.

**Qodobka 15aad: Saamaynta BurintaShahaadada Maalgashiga**

1) Marka shahaadada lagala noqdo, Maalgashaduhu waxa uu isla markaaba waayayaa dhammaan xuquuqihii uu lahaa ee uu shahaadada ku helay.

2) Burinta shahaadada ogolaanshaha maalgashigu waxa ay joojinaysaa mashruucii maalgelinta, maalgashaduhuna waa in uu bixiyo dhammaan cashuurihii lagaga dhaafay ogolaanshaha maalgashiga.

3) Maalgashadaha shahaadada lagala noqday waxa uu ku soo celinayaa dhammaan faaiidooyinka ay

**Article 15: Effects of Investment Certificate Revocation**

1) Upon revocation of an investment Certificate, the investor shall immediately lose all entitlements resulted from the certificate.
